| | | |
|---|---|---|
| Rady Children's Hospital San Diego<br><br>☒ **XEERKA**<br>☐ **HABRAACA**<br>☐ **HEERKA DARYEELKA**<br>☐ **HABRAACA DEGSAN**<br>☐ **TILMAANTA**<br>☐ **WAX KALE** | TAARIIKHDA ANSIXINTA:<br>**Maarso 2024**<br><br>CIWAANKA:<br>**URUURINTA BIILKA IYO DAYNTA**<br><br>WAXAA FULINAAYA<br>**Dhammaan Waaxaha RCHSD iyo RCSSD, Mareegta Dakhliga, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, U fududeynta Bukaanka adeegga iyo La taliyaasha Dhaqaalaha** | TUSMADA:<br>**Xeerka Isbitaalka**<br><br>LAMBARKA TIXRAACA:<br>**HPM 7-56** |

## 1.0 UJEEDADADA:

1.1 Si loo abuuro farsamooyinka biilka iyo uruurinta daynta taas oo waafaqsan sharciyada iyo xeerarka Federaalka iyo California .

## 2.0 QEEXITAANNADA:

2.1 **Adeeg Bixiye Awood u leh** waxaa laga wadaa adeeg bixiye sadexaad ogolaansho ka haysta Rady Children's si uu shaqooyin kaladuwan ugu qabto Rady Children's, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, biilka bukaanka iyo uruurinta biilka bukaanka ee aan la bixin**.**

2.2 **Daryeelka Deeqda ah** waxaa laga wadaa midkood daryeel gebi ahaanba deeq ah ama daryeel qayb ahaan deeq ah.

2.2.1 **Daryeelka Buuxa ee Deeqda** waxaa laga wadaa adeegyada daryeelka caafimaadka ee bilaashka ah, kuwaasoo bukaanka/Damiinka aan laga dooneyn inuu biyo wax qarash ah oo aan ka ahayn qaybta caymiska.

2.2.2 **Daryeelka Deeqda ah ee Qaybta ah** waxaa laga wadaa in bukaanka/ Damiinka aan laga dooneyn inuu bixiyo qayb kamid ah qarashaadka.

2.3 **Wakaallada Dayn Uruurinta** waa adeeg bixiye ogolaansho loo siiyay kaas oo sameeya shaqooyinka dayn uruurinta kadib marka bukaanku ku fashilmo bixinta qarashka, ama ay samayso qorsheyaal ay aqbali karto Rady Children's si loo dhiibo, qarash qayb ka ah mareegta caadiga ah ee biilka isbitaalka. Erayga Wakaallada Dayn Uruurinta kuma jiro Adeeg Bixiye Ogolaansho haysta si uu u fuliyo shaqada caadiga ah ee biilasha Rady Children's.

2.4 **Barnaamijka Faa'iido Wadaagista Qarashka (CSBP),** barnaamij ku saleysan xubinimada kaas oo qofka xubinta ka ah uu dhiibaayo qarashka

joogtada ah (caadiyan bilaha ah) ee xubinimada iyo qarashaadka bil kasta la siiyo xubnaha u baahan in laga caawiyo qarashaadkooda caafimaadka. Caadiyan barnaamijyada faa'iidada ayaan aqbali doonin in qarashka toos looga dalbado waxayna heshiis kula galaan xubnahooda in loo celin doono qarashaadkooda caafimaadka.

2.5 **Uruurinta Daynta** waxaa laga wadaa dhammaan xiriirada ku saabsan lacag bixinta ee uu bixiyo Rady Children's (ama wakiilkiisa, ayna ku jiraan shaqaalaha hoose, wakiil, wakaalad dayn uruurinta, ama iibsadaha dayntiisa) ee lala sameeyo bukaanka/Damiinka kadib marka biilka koowaad la diro.

2.6 **Lacag bixinta** waxaa laga wadaa marxalad uu isbitaalku go'aansho in aan bukaanku u qalmin Daryeelka Deeqda ah ee Buuxa laakiin u qalma qiimo dhimis lagana doonaayo inay bixiyaan keliya qayb kamid ah qarashka. Kani waa nooc kamid ah Daryeelka Qayb ahaan Deeqda ah.

2.7 **Dhakhtarka Xaalada Degdega ah** waxaa laga wadaa dhakhtar xubin ka ah shaqaalaha Caafimaadka ee Isbitaalka waxaana qandaraas kula jira Isbitaalka si uu ubixiyo adeegyada caafimaadka ee waaxda xaalada degdega ah (ED). Dhakhtarka Xaalada Degdega ah kuma jiro dhakhtarka taqasuska ee loogu yeero qaybta xaalada degdeg ah ama kamid ah shaqaalaha, ama leh awoodaha kale, ee Isbitaalka oo ka baxsan Waaxda Xaalada Degdega ah.

2.8 **Qarashka Nooliga Aasaasiga ah** waxaa laga wadaa qarashaadka midkasta oo kamid ah kuwa soo socda: kirada ama lacagta guriga iyo dayactirka, agabka cuntada iyo guriga, adeegyada guriga iyo taleefanka, dharka, lacagaha caafimaadka iyo daryeelka ilkaha, caymiska, dugsiga iyo daryeelka carruurta, taageerada ilmaha iyo xaaska, qarashaadka gaadiidka iyo gaariga, ayna ku jiraan caymiska, gaaska, iyo dayactirada, lacagaha qoondada, dhar dhaqaalka iyo nadaafada, iyo qarashaadka kale ee qayru caadiga ah.

2.9 **Shaqooyinka Dayn Uruurinta ee Qayru Caadiga ah (ECAs)** waxaa ku jira soo sheegista warbixinta xun ee loo gudbiyo wakaaladaha daynta, la wareegista hantida qofka, la wareegista guriga, qayb goosashada ama la wareegista koontada bangiga ee qofka ama hantida kale ee gaarka ah, soo gudbinta dacwad madani ah oo ka dhan ah qof ama gal dacwadeed, taasoo keenaysa in qofka la xiro, dib u dhigista ama diidista daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah sabab la xiriirka inaan qofku dhiibin qarashka daryeelka horey loo siiyay ee ku jira FAP, qasab ka dhigista bixinta qarashka kahor inta aan la bixin daryeelka caafimaad ahaan muhiimka ah sabab la xiriirta in lagu leeyahay daynta lacagta daryeelkii hore, gooashada mushaaraadka qofka, iyo ka iibinta daynta bukaanka dhinac kale. ECAs kuma jiraan u wareejinta koontada Adeeg Bixiye Ogolaansho haysta si uu u sameeyo dayn uruurin ayadoo aan la adeegsan wax ECAs ah.

2.10 **Qoyska ama Qoyska Bukaanka** waxaa laga wadaa, bukaannada 18 sano iyo wayn jira, xaaska bukaanka, lamaanaha diiwaan gashan ee maxaliga ah, iyo

carruurta ku tiirsan ee ka yar 21 sano jir, haddii ay guriga joogaan iyo haddii kaleba. Bukaannada kayar 18 sano jir, Qoyska waxaa kamid ah waalidka bukaanka, qaraabada daryeelka bixisa, iyo carruurta kale (ee ka yar 21 sano) ee waalidka ama qaraabada daryeelka bixiya.

2.11 **Barnaamijyada Kaalmada Dhaqaalaha (FAP)** waxaa laga wadaa xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee barnaamijka Rady Children's (lagu sheegay Xeerarka Quseeya,. ee hoose) loona sameeyay inay ka caawiso Bukaannada Dhaqaale ahaan u Qalma helitaanka Qarashaad qiimahooda la Dhimay ama Daryeelka Deeqda ah ee Adeegyada Isbitaalka iyo adeegyada Dhakhtarka Xaalada Degdega ah.

2.12 **Ka Qaybgalaha FAP** waxaa laga wadaa Bukaanka Dhaqaale Ahaan u qalma Rady Children's.

2.13 **Bukaanka Dhaqaale ahaan u Qalma** waxaa laga wadaa:

2.13.1 Bukaan aan Caymis Haysan oo leh dakhliga Qoyska oo ku siman ama ka hooseeya 550% heerka FPL; ama
2.13.2 Bukaan Caymis haysta ama Bukaanka CSBP ee aan Caymiska Hyasan oo galay qarashaadka Aadka U badan ee Caafimaadka dakhliga Qoyskiisuna ku siman yahay ama ka hooseeyo 450% heerka FPL; ama
2.13.3 Bukaan Caymis haysta ama Bukaanka CSBP ee aan Caymiska Hyasan laguna leeyahay lacagaha aan caymisku daboolin dakhliga Qoyskiisuna ku siman yahay ama ka hooseeyo 450% heerka FPL; ama
2.13.4 Bukaan, haddii uusan lahan caymiska, uu leeyahay caymis, ama uu xubin ka yahay CSBP, kaas oo lagu leeyahay Qarashaadka Aadka u Badan ee Caafimaadka.

2.14 **Warada Macsalaamaynta** waa ogeysiis Rady Children's laga doonaayo inay dirto kahor inta aysan xisaab u gudbin dayn uruurin ama ka iibin koontada wakaalad daynta iibsata.

2.15 **Damiinka** waxaa laga wadaa qofka leh masuuliyada qarashka adeegyada daryeelka caafimaadka ee bukaanka, oo caadiyan ah bukaanka, waalidka, ama masuulka sharciga ah.

2.16 **Qarashaadka Sareeya ee Caafimaadka** waxaa laga wadaa mid kasta oo kamid ah waxyaabaha soo socda, marka loo eego taariikhaha adeegga:

2.16.1 Qarashaadka sanadlaha ah ee jeebka laga dhiibo oo si dhab ah uu u baxshay bukaanka caymiska haysta ee jooga Isbitaalka kaas oo ka baxsan 10% dakhliga Qoyska 12 bilood ee lasoo dhaafay (oo lagu go'aansho in la isku barbar-dhigo qarashaadka bukaanka/Damiinka uu jeebka ka dhiibo ee bukaanka iyo dakhliga Qoyska Bukaanka ee isla mudadaas 12 bilood ah). Tusaale, haddii bukaanka/damiinku soo gudbiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha (FAA) maalinta Janaayo

1 deeda, dukumiintiga dakhliga iyo qarashaadka waa in la bixiyaa kahor Janaayo 1 deeda ilaa Diseembar 31 deeda.

2.16.2 Qarashaadka sanadlaha ah ee jeebka laga dhiibo oo laga baxshay bukaan caymis haysta oo Isbitaalka jooga kaas oo ka badan 10% dakhliga hadda ee qoyska. Marka dakhliga hadda loo adeegsado aasaaska go'aanka, talo bixinta dhaqaalaha ayaa adeegsan doonta dakhliga laga bilaabo bisha codsiga kaalmada Dhaqaalaha (FAA) kadibna ku dhufanaysa 12 si ay u go'aamiso dakhliga sanadlaha ah ee la filaayo.

2.16.3 Qarashaadka sanadlaha ah ee jeebka laga dhiibo oo uu baxshay bukaanku kana badan 10% dakhliga Qoyska ee 12 bilood ee lasoo dhaafay ama dakhliga hadda ee qoyska haddii bukaanka/Damiinku keeno dukumiintiga qarashaadka caafimaadka ee la baxshay kahor 12 bilood (oo lagu go'aaminaayo isku eegista wadarta guud ee qarashaadka caafimaadka, ayna ku jiraan kuwa aan ku bixin Isbitaalka, oo uu bukaanku dhiibay iyo dakhliga Qoyska Bukaanka). Haddii dakhliga hadda la adeegsado, talo bixinta dhaqaalaha ayaa adeegsan doonta dakhliga laga bilaabo bisha codsiga kaalmada Dhaqaalaha (FAA) kadibna ku dhufanaysa 12 si ay u go'aamiso dakhliga sanadlaha ah ee la filaayo.

2.17 **Bukaan Caymiska Haysta** waxaa laga wadaa bukaan caymis ka hela dhinac sadexaad oo Qarashka Bixiya, sida shirkada caymiska caafimaadka, qorshaha adeegga daryeelka caafimaadka, Medicare, ama Medicaid.

2.18 **Hanti Lacageed** waxaa laga wadaa hanti loo badelan karo kaash, sida koontooyinka baanka iyo kaydadka ganacsiga ee dadwaynaha, laakiin maaha hanti u baahan in la iibsho sida guryaha. Hanti lacageed kuma jirto lacagaha qorsheyaasha hawlgabka ama magdhawga dib loo dhigay, iyo midna $10,000 ee ugu horeeya ee Hantida Lacagta, walaa 50% Hantida Lacagta ee ka badan $10,000 ee koowaad, ayaan lagu tirin doonin si loo go'aansho u qamida FAP ayadoo lagu saleynaayo hantida lacagta ah.

2.19 **Sharciga Mamnuucaaya Qarashaadka lama Filaanka ah** wuxuu qabanayaa isbitaallada iyo dhakhaatiirta; wuxuu quseeyaa difaacyada dhaqaalaha iyo xogta ee shaqsiyaadka caymiska ka hela caymisyada ganacsiga wuxuuna xadiyo cusub saarayaa qaadista baaqiga iyo wadaagista qarashka bukaanka ee Bukaannada Bilaa Caymiska ah iyo Kuwa Iskood U Dhiibaay.

2.20 **Dakhliga Bukaanka/Qoyska** waxaa laga wadaa dakhliga oo loo xisaabshay sida soo socota: Dakhliga guud ee Qoyska Bukaanka kahor canshuuraha, lacagaha dhiman ee lagu baxshay alimony iyo taageerada ilmaha (Qorsheyaasha hawlgabka ama magdhawga dib loo dhigay ee ku cad Xeerka Dakhliga Gudaha, ama qorsheyaasha aan u qalmin ee magdhawga dib loo dhigay, ayaan lagu dari doonin xisaabinta dakhliga.)

2.21 **Qorshaha Lacag bixinta** waxaa laga wadaa qarashaadka bilaha ah oo ku saleysan shuruudaha heshiis u dhexeeya Isbitaalka iyo bukaanka/Damiinka.

2.22 **Qorshaha Lacagaha bixinta Macquulka** waxaa laga wadaa lacagaha bilaha ah kuwaasoo aan ka badnayn 10% Dakhliga bukaanka/Qoyska ee bishii, marka laga reebo lacagaha loo jaro Qarashaadka Nooliga ee Aasaasiga ah.

2.23 **Bukaanka Asagu Iska Dhiibaaya** waxaa laga wadaa bukaan aan haysan ama doorta inuusan adeegsan caymiska qolo sadexaad oo uu ka helo shirkad caymis, qorshaha adeegga daryeelka caafimaadka, Medicare, ama Medicaid, iyo bukaan dhaawiciisu yahay dhaawac aan u qalmin magdhaw lagu bixiyo magdhawga shaqaalaha, ama caymis kale sida uu go'aansho uuna diiwaan gasho Isbitaalku.

2.24 **Bukaannada Iskood U dhiibaaya Qarashka ee Dhaqaale ahaan U qalma** waa bukaannada haysta caymiska Qarash Bixiye Sadexaad ama Caymiska Shirkad Sadexaad oo Dakhliga Bukaanka/Qoyskuna uusan ka badnayn 550% heerka FPL. Bukaannada Iskood U dhiibaaya ee Dhaqaale ahaan u qalma waxaa ku jira bukaannada Daryeelka Deeqda ah.

2.25 **Caymiska Dhinaca Sadexaad** waxaa laga wadaa caymiska Qarash Bixiyaha Sadexaad ama lagu bixiyo Barnaamijka Gunnada Qarash Wadaaga.

2.26 **Lacag Bixiyaha Dhinaca Sadexaad** waxaa laga wadaa caymiska gaarka loo leeyahay ama shirkada dhiibaysa sheegashooyinka ayagoo wakiil ka ah qofka caymiska qaata, dib u celisa oo maamysho qarashaadka caafimaadka bixisana caymiska caafimaadka oo uu ku jiro caymiska lagu bixiyo Isdhaafsiga Gunnooyinka Caafimaadka ee California, Magdhawga Shaqaalaha, aymiska gaariyaasha, iyo sidoo kale caymiska barnaamijka caafimaadka ee dawlada sida Medi-Cal, CCS, TRICARE. Medicare, CHAMPUS, Healthy Families.

2.27 **Bukaanka Aan Caymiska Haysan** waxaa laga wadaa bukaan aan haysan caymis uu bixiyo Qarash Bixiye Sadexaad.

2.28 **Bukaanka Aan Caymiska Haysan ee CSBP** waxaa laga wadaa bukaannada ah Bukaannada Bilaa Caymiska ah iyo kuwa xubnaha ka ah Barnaamijka Gunnada Qarashka Wadaaga ah.

## 3.0 <u>XEERKA:</u>

3.1 Rady Children's wuxuu taageeraa helitaanka daryeelka caafimaadka tayada leh ee carruurta asagoo abuura xeerarka cadaalada ah ee hufan biil qaadista iyo uruurinta daynta ee Adeegyada Dhakhtarka Xaalada Degdega ah iyo Isbitaalka, si waafaqsan sharciga iyo xeerarka California iyo kuwa federaalka.

3.2 **DALABKA HORE EE QARASHKA:**

3.2.1 Kahor inta aan loo dirin dalabka hore ee qarashka bukaanka/Damiinka, Rady Children's ayaa:

3.2.2 Sameeynta doona dhammaan dedaallada macquulka ah si:

3.2.2.1 Uu u helo una xaqiijiyo xogta Lacag Bixiyaha Sadexaad ee Bukaanka/Damiinka, si waafaqsan xeerarka HPM 7-55, qiimaha Cadaallada ah ee xaalada Degdega ah ee Isbitaalka iyo Dhakhtarka iyo HPM 7-11, Barnaamijyada Kaalmada Dhaqaalaha.

3.2.2.2 Si uu u helo xaqiijinta faa'iidada iyo ogolaanshaha hore.

3.2.2.3 Si uu u helo lacag celinta saxda ah ee Qarash bixiyaha Sadexaad asagoo diraaya sheegashooyin, dabagal iyo hanaannada racfaanka marka loo baahdo.

3.2.2.4 Xaqiijinaaya fulinta sheegashada loo diro Qarash Bixiyaha Sadexaad.

3.2.3 U xilsaaraaya bukaanka/Damiinka cadadka saxda ah ee masuuliyada dhaqaalaha, sida lagu xadidi karo masuuliyada Qarash Bixiyaha Sadexaad (sheegashooyinka iyo lacag bixinta) iyo/ama Barnaamijyada Kaalmada Dhaqaalaha, sida ku haboon.

3.2.4 Inuusan dib u xisaabin masuuliyada dhaqaalaha ee bukaanka/Damiinka asagoo ku saleynaaya dakhliga ama hantida aan lagu darin markii la go'aaminaayay u qalmida FAP.

3.2.5 Inuusan baaqiga ka qaadin bukaanka/Damiinka marka koowaad haddii wax kamid ah shuruudaha soo socda ay run yihiin:

3.2.5.1 Taariikhda qarashka laga codsanaayo bukaanka/Damiinka la diro, ay ka badan tahay 6 bilood ilaa taariikhdii ugu danbaysay ee Rady Children's ay heshay sharaxaada gunnooyinka ee ka yimaada Qarash Bixiyaha Sadexaad iyo inaan loo dirin warqada isku dubaridka gunnooyinka (COB) ama masuuliyada dhinaca sadexaad (TPL) bukaanka/ Damiinka taasoo codsanaysa xog dheeri ah oo ay u baahan tahay Shirkada Sadexaad ee Qarashka Bixinaysa si loo bixiyo qarashka adeegyada Rady Children's bixiyay.

3.2.5.2 Wax ka badan 6 bilood ay kasoo wareegtay intii u dhexaysay markii sheegashada koowaad loo diray Qarash Bixiyaha Sadexaad iyo taariikhda isbitaal ka saarida ee adeegga

qarashkiisa la dalbaday iyo in aan warqada COB ama TPL loo dirin bukaanka ayadoo looga codsaday xog dheeri ah oo ay u baahan qarash Bixiyaha Sadexaad si loo bixiyo qarashka adeegyada uu bixiyayabRady Children's.

## 3.3 OGEYSIISYADA QARASHKA

3.3.1 Xogta soo socota ayaa lagu dari doonaa dhammaan ogeysiisyada qarash dalbashada ee loo diro Bukaannada/Damiinnada:

3.3.1.1 Qarash dalbashada koowaad, sharaxaada baaqiga lagu leeyahay bukaanka. Marka uu codsado, cadeynta qodobaysan ee qarashaadka;

3.3.1.2 Qarash dalbashooyinka xiga, baaqiga haray ee qarashaadka aan la dhiibin;

3.3.1.3 Codsiga xog qusaysa daboolista caymiska;

3.3.1.4 Cadeyn sheegaysa in haddii bukaanka/Damiinku uusan haysan, ama uu haysto caymis aan ku filnayn, uuna buuxsho shuruudaha qaar ee dakhliga, bukaanka/Damiinka ayaa u qalmi kara barnaamijka dawlada (tusaale, Medi-Cal, CCS, Healthy Families, ama caymis lagu bixiyo Isdhaafsiga faa'iidada Caafimaadka ee California) ama FAP;

3.3.1.5 Cadeyn sheegaysa sida aad ku helayso codsiyada barnaamijyada Medi-Cal, CCS, iyo Healthy Families, caymis lagu bixiyo Isdhaafsiga faa'iidada Caafimaadka ee California, ama barnaamij kale oo caymiska caafimaadka ah oo ay maal geliso dawlada gobalka ama degmada iyo sida lagu helo codsiyada FAP; iyo

3.3.1.6 Haddii bukaanku uusan sheegin caymis uu ka helo shirkad Sadexaad, Caymiska Dhinaca Sadexaad oo kale ama uusan codsan qiimo dhimis ama daryeelka Deeqda ah, Rady Children's ayaa bixinaaya codsiga Medi-Cal ama barnaamijyada kale ee caymiska ee gobalka ama degmadu maal geliso kahor inta aan isbitaalka laga saarin.

3.3.1.7 Lambarka taleefanka ee waaxda ay qusayso ee Rady Children's si xog dheeri ah looga helo kaalmada dhaqaalaha iyo sida loo codsado kaalmada noocaas ah.

3.3.1.8 U gubinta xarunta kaalmada macmiilka ee maxaiga ah oo ku taalla xafiisyada adeegyada sharciga.

## 3.4 **QORSHEYAASHA LACAG BIXINTA**

3.4.1 Rady Children's:

3.4.1.1 wuxuu siiyaa dhammaan bukaannada/Damiinnada, ayadoo aan loo eegayn u qalmida FAP, dookha bixinta lacagaha ayadoo la raaxaayo qorshaha lacag bixinta mudada dheer.

3.4.1.2 wuxuu kala hadlayaa shuruudaha qorshaha lacag bixinta Bukaanka/Damiinka wuxuuna tixgelinayaa Dakhliga Bukaanka/Qoyska iyo Qarashaadka Aasaasiga ah ee Nooliga.

3.4.1.3 wuxuu adeegsanayaa hanaanka sharciga ah si uu u abuuro Qorshaha Lacag Bixinta Macquulka ah, haddii Isbitaalka iyo Bukaanka/Damiinku ku heshiin karin qorshe lacag bixin.

3.4.1.4 wax dulsaar ah ma saari doono qorsheyaal kasta oo lacag bixin, ayna ku jiraan kuwa la siiyo Macmiilka FAP.

3.4.1.5 wuxuu go'aaminayaa mudada qorshaha lacag bixinta ayadoo la tixgelinaayo lacagta lagu leeyahay iyo khayraadka dhaqaalaha iyo Qarashaadka Aasaasiga ah ee Nooliga Bukaanka/Damiinka.

3.4.1.6 wuxuu u aqoonsan karaa qorshaha lacag bixinta mid aan waxtar lahayn haddii bukaanka/Damiinku ku fashilmo inuu sameeyo dhammaan lacagaha lagu leeyahay sabab la xiriirta inta lagu jiro mudada 90 maalmood ah.

3.4.1.6.1 Waxaa jiri doona iskudayga koowaad si loola xiriiro bukaanka/Damiinka oo lagu helaayo taleefanka (lambarkii u danbeeyay ee lagu ogaa) uuna siiyo ogeysiis qoraal ah (oo loogu diraayo ciwaankii ugu danbeeyay ee lagu ogaa), in qorshaha lacag bixintu uusan sii shaqeyn doonin, loona sheego bukaanka/Damiinka fursada dib uga wada hadlida qorshaha lacag bixinta iyo in la iskudayo in lagala hadlo haddii uu codsado bukaanka/Damiinku.

3.4.1.6.2 Warbixinta loo diro wakaalada ka warbixisa daymaha macmiilka ayaan la samayn doonin ama dacwad madani ah ayaan la bilaabi doonin ilaa qorshaha lacag bixinta loo aqoonsanaayo mid aan shaqeynayn.

## 3.5 HABRAACYADA DAYN URUURINTA

3.5.1 Rady Children's ayaa

3.5.1.1 u gudbinaaya daynta bukaanka dayn uruurin, haddii uu samaynaayo Isbitaalku, ama wakiilkiisu, ayna ku jiraan shaqaalaha, wakiilka, wakaalada dayn uruurinta, ama iibsadaha daynteeda, keliya sida ku cad xeerkaan.

3.5.1.2 wuxuu samayn doonaa dedaallo macquul ah oo waafaqsan xeerka Barnaamijyada Kaalmada Dhaqaalaha si loo go'aansho haddii bukaan/Damiin uu u qalmo caawimaad dhaqaale kahor inta uusan samayn wax talaabooyin dayn uruurin ah, ayna ku jiraan talaabooyinka dayn uruurinta qayru caadiga ah (ECAs).

3.5.1.2.1 Bukaan/Damiin ayaa la siin doonaa tilmaamo ku aadan sida loo codsado caawimaad dhaqaale oo ku aadan biilalka koowaad iyo kuwa danbe, wicitaannada xasuusinta baaqiga, iyo marka uu wacaayo kooxda Adeegga Macaamiisha ee PFS si uu wax uga waydiiyo baaqiyada koontada.

3.5.1.2.2 Marka la gudbiyo codsiga buuxa ee kaalmada dhaqaalaha, Waaxda Talo Bixinta Dhaqaalaha ayaa samayn doonta go'aanka kama danbaysta ah ee u qalmida FAP kahor inta aan talaabooyinka dayn uruurinta lasii wadin.

3.5.1.3 Ugu yaraan sodon (30) maalmood kahor inta aan la bilaabin wax ECAs ah,: siinaaya bukaanka ogeysiiska qoran kaas oo:

3.5.1.3.1 Sheegi doona in Kaalmada Dhaqaalaha ay heli karaan shaqsiyaadka u qalma;

3.5.1.3.2 Aqoonsanaaya ECAs yada Rady Children's ama Adeeg Bixiyihiisa Awooda u leh uu doonaayo inuu qaado si loo helo qarashka daryeelka;

3.5.1.3.3 Wakhtiga gobalku u cayimay kaas oo ECAs yada la bilaabi karo kaas oo aan ka horeyn karin 30 maalmood kadib taariikhda ogeysiiska la baxshay; iyo

3.5.1.3.4 Raaci bayaanka soo socda: "Sharciga gobalka iyo kan federaalka ayaa ka doonaaya dayn qaadeyaasha inay kuula dhaqmaan si cadaalad ah

kana mamnuucaaya dayn uruuriyaasha inay soo gudbiyaan sheegashooyin been ah ama hanjabaadaha rabshada, ayagoo adeegsanaaya luuqad cay ama handadaad ah, iyo inay sameeyaa xiriirada khaldan ee ay la sameeyaan dhinacyada sadexaad, ayna ku jirto cida aad u shaqeyso. Marka laga reebo marka ay jiraan xaalado qayru caadi ah, dayn uruuriyaasha ayaan kula soo xiriiri karin kahor 8 subaxnimo ama kadib 9 habaynimo. Si guud, dayn uruuriyaha ayaan siin karin xog ku saabsan dayntaada qof kale, oo aan ahayn qareenkaaga ama xaaskaaga. Dayn uruuriyaha ayaa la xiriiri kara qof kale si uu u xaqiijiyo meesha aad joogto ama u fuliyo xukun. Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan shaqooyinka dayn uruurinta, waxaad la xiriiri kartaa Gudiga Ganacsiga ee Federaalka oo aad ka helayso taleefanka 1-877-FTC-HELP (382-4357) ama barta oonlaynka ah www.ftc.gov."

3.5.1.4 Wuxuu siinayaa bukaanka khulaasada luuqada fudud ee FAP ka Rady Children's oo wata ogeysiiska ECA oo qoran ee lagu qeexay qaybta 4.4.1.3.1 ee kore.

3.5.1.5 Wuxuu iskudayayaa inuua deegsado ECA-yada soo socda si uu iskugu dayo uruurinta daynta laakiin ugu yaraan 190 maalmood waa inay kasoo wareegtay kadib bayaankii koowaad ee dalabka qarashka kadib isbitaal ka saarida:

3.5.1.5.1 Soo sheegista xogta xun ee ku saabsan shaqsiyada qofka oo loo diro wakaaladaha soo sheega daynta.

3.5.1.5.2 Hanaanka sharciga iyo garsoorka oo uu ku jiro bilaabista dacwad madani ah ama hawsha goosashada mushaarka.

3.5.1.6 Waxay siinayaan bukaanka/damiinka ogeysiiska cad ee qeexan ee waxyaabaha soo socda kahor inta aysan bilaabin shaqooyinka dayn uruurinta: khulaasada luuqada fudud ee xuquuqda bukaanka ee la xiriirta sharciga Xeerka Qiimaha Cadaalada ah ee Isbitaalka, Sharciga Farsamooyinka Dayn Uruurinta Cadaalada ah ee Rosenthal, iyo Sharciga Farsamooyinka Dayn Uruurinta Cadaalada ee Federaalka. Ogeysiiska waxaa sidoo kale ku jiri doona xog ku saabsan adeegyada talo bixinta daynta ee haayadaha khayriga ah oo laga heli karo aaga. Ogeysiiskaan:

3.5.1.6.1 Caadiyan, waxaa la raacin doonaa biilka koowaad ee loo diro bukaanka/Damiinka.

3.5.1.6.2 Markasta waxaa la bixin doonaa kahor inta aan koontada loo gudbin wakaalada dayn uruurinta.

3.5.1.6.3 Waxaa lagu dari doonaa dukumiintiga kasto oo sheega marka la bilaabi doono talaabooyinka dayn uruurinta.

3.5.1.6.4 Waxaa ku jiri doona xaashida tilmaanta oo ay ku jirto xog ku qoran Ingiriis iyo 15 luuqadood ee ugu badan ee ay ku hadlaan shaqsiyaadka Ingiriiskoodu kooban yahay ee ku dhaqan California, sida ay go'aamiso Waaxda Adeegyada Daryeelka caafimaadka ee gobalka.

3.5.1.7 Waxaa bukaanka/Damiinka loo dirayaa Warqada Macsalaamaynta kahor inta aan koontada lagu wareejin wakaalada daymaha oo banaanka ah aana ka horayn 180 maalmood laga bilaabo biilkii koowaad, ayadoo la raacinaayo xog soo socota:

3.5.1.7.1 Taariikhda ama taariikhaha adeegga biilka kaas oo loo gudbinaayo uruurin ama la iibinaayo.

3.5.1.7.2 Magaca wakaalada loo gudbinaayo biilka.

3.5.1.7.3 Bayaan bukaanka u sheegaaya sida uu uga helaayo biilka isbitaalka oo qodobaysan isbitaalka.

3.5.1.7.4 Magaca iyo nooca qorshaha caymiska caafimaadka ee bukaanka ugu qoran diiwaanka isbitaalka marka adeegyada la bixinaayay ama bayaan sheegaaya inaan isbitaalku hayn xogtaas.

3.5.1.7.5 Codsiga daryeelka Deeqda ah ee isbitaalka iyo kaalmada Dhaqaalaha.

3.5.1.7.6 Taariikhda ama taariikhaha bukaanka markii koowaad loo diray ogeysiiska quseeya codsashada kaalmada Dhaqaalaha, taariikhda ama taariikhaha bukaanka loo diray codsiga kaalmada dhaqaalaha, iyo, hadday jirto, taariikhda go'aanka codsiga laga gaaray.

3.5.1.8 inuusan koontada u dirin wakaalada daynta qaada marka bukaanka/Damiinku uu iskudayaayo si daacad inuu qarashka bixiyo asagoo kala hadlaaya qorshe lacag bixin ama uu soo gudbiyay codsiga buuxa ee kaalmada dhaqaalaha.

3.5.1.9 inuusan u adeegsan xogta Dakhliga ama Hantida Lacageed ee Bukaanka/Qoyska ee la helay intii lagu jiray hawsha u qalmida FAP sababo quseeya abuurista talaabooyinka dayn uruurinta sida lagu qeexay xeerkaan.

3.5.1.10 inuu adeegsado shaqaalaha si loo sameeyo dayn uruurinta kuwaasoo aan qayb ka ahayn go'aaminta u qalmida FAP ee bukaanka.

3.5.1.11 inuu ku hayo xogta qusaysa hantida ama dakhliga oo qaybta ka ahayd hawsha u qalmida FAP gal ka duwan kan xogta loo adeegsanaayo dayn uruurinta, Galka u qalmida FPA ayaysan heli karin shaqaalaha samaynaaya hawlaha dayn uruurinta.

3.5.1.12 inuu u sheego wakaaladaha dayn uruurinta ee qandaraaska ka haysta u qalmida FAP si wakaaladu u soo sheegto cadadka lacagaha ay u aqoonsato kuwo aan lasoo uruurin karin sabab la xiriirta inuusan awoodin inuu bixiyo sida ku cad tilmaamaha u qalmida FAP.

3.5.1.13 inuu ka helo heshiiska qoran wakaalad kasta oo dayn uruurin ama iibsadaha daynta kaas oo daynta uu ka iibiyay, kaas oo sheegaaya in wakaaladaas ay ku dhaqmi doonto xeerarka soo socda:

3.5.1.13.1 FAP ka Rady Children's, Xeerka Qiimaha Cadaalada ah, iyo xeerkaan Biilka iyo Uruurinta Daynta.

3.5.1.13.2 Waa inuu ruqsad uga haystaa inuu yahay dayn uruuriye Waaxda Difaaca iyo Hal Abuurka Dhaqaalaha.

3.5.1.13.3 Iibsadeyaasha daynta keliya: Waa inaysan dib u iibin ama wareejin daynta bukaanka, ilaa in wakaalada la iibiyo maahee ama lagu dhafo wakaalad kale.

3.5.1.13.4 Iibsadeyaasha daynta keliya: Waa inaysan saarin dulsaar ama lacag dheeri ah daynta bukaanka.

3.5.1.13.5 Shardi Dhaafyada:

3.5.1.13.5.1 Wakaalada daynta uruurisa ama iibsadaha daynta kaas oo aan ahayn wakiilka ama shaqaalaha Isbitaalka ayaa mushaar goosi ku samayn kara bukaanka/Damiinka marka ay amarto maxkamad marka lasoo gudbiyo codsiga la ogeysiiyay, oo uu a socdo shaacinta aqoonsiga aasaaska la aaminsan yahay in bukaanku awoodo inuu lacagaha bixiyo ayadoo lagu saleynaayo xukunka jarashada mushaarka.

3.5.1.13.5.2 Wakaalada daynta ama dayn iibsadaha aan ahayn wakiilka ama shaqaalaha Isbitaalka ayaan shaacin karin ama samayn karin iibinta guriga bukaanka/Damiinka inta uu noolyahay bukaanka ama xaaskiisu, inta lagu jiro mudada ilmaha bukaanku uusan qaan gaarin, ama inta lagu jiro udada ilmaha bukaanka ee gaaray da'da qaangaarnimada uusan awoodin daryeelida naftiisa ama nafteeda uuna dagan yahay guriga oo ah hooygiisa rasmiga ah.

3.5.1.14 waa inaysan u sheegin 180 maalmood kadib biilka koowaad xogta xun wakaalada warbixinta daynta macaamiisha ama bilaabin dacwad madani ah oo ka dhan ah bukaanka/Damiinka ee bukaannada Aan Caymiska Haysan Laguna Yeeshay Qarashaadka Xad Dhaafka ah.

3.5.1.15 waa in loo kordhiyaa muddaan 180 maalmood ah bukaannada racfaankoodu wali furan yahay (kaas oo ay ku jiraan tusaale ahaan cabasho, dib u eegista caafimaadka ee madaxa banaan, dib u eegista dhagaysiga Cadaalada ah ee sheegashada Medi-Cal, ama racfaanka caymiska Medicare) kaas oo ka dhan ah Shirkada Caymiska, si bukaanka/Damiinka loo siiyo 180 malmood kadib taariikhda dhamaystirka racfaanka si uu lacagta u bixiyo.

3.5.1.16 waa inay kasoo ceshaan koonto wakaalada dayn uruurinta haddii cadeynta u qalmida bukaanka ee caymis caafimaad oo ganacsi ama Medi-Cal la keento waana inuu u sheegaa

wakaaladihiisa dayn uruurinta xogta caymiska, kuna amraa wakaaladaha inay joojiyaan hawlaha dayn uruurinta ee biilka aan la bixin ee adeegyada caymisku daboolaayo, uuna u sheego bukaanka/Damiinka in talaabooyinka kore la qaaday. Xogta horey loogu diray wakaalada daynta soo sheegta ee ay dirtay wakaalada dayn uruurinta ayaa la sixi doonaa 30 maalmood gudahood xaqiijinta u qalmida bukaanka kadib.

3.5.1.17 ma adeegsan doono wuxuuna ka mamnuuci doonaa wakiilkiisa kaas oo ah shaqaale ama la shaqeeye inuu adeegsado, mushaar jaris ama la wareegista guryaha bukaanka/Damiinka si loo qaado lacagta Isbitaalka ee aan la bixin ee qusaysa bukaanka u qalma FAP.

3.5.1.18 marka uu qarash celinta adeegyada Xaalada Degdega ah ee Dhakhtarka ka dalbanaayo Maddy Fund, waa inuu joojiyaa biil kasta ama shaqada lacag uruurinta ee bukaankaas. Haddii aysan lacagta bixin Maddy Fund, biilka iyo dayn uruurinta ayaa dib u bilaabanaaya si waafaqsan xeerkaan iyo xeerarka kale ee Rady Children's.

## 4.0 XEERARKA LA XIRIIRA:

4.1 Barnaamijyada Kaalmada Dhaqaalaha, HPM 7-11
4.2 Qiimaha Cadaallada ah ee Isbitaalka iyo Dhakhtarka ee Xaalada degdega ah, HPM 7-55

## 5.0 ILLAHA:

5.1 California AB 774 (2007), AB 1503 - (2010), SB 1276 – (2014), AB 1020 (2022), AB 532 (2022)
5.2 Sharciga Xeerarka Qiimaha Cadaalada ah ee Isbitaalka (Xeerka Caafimaadka iyo Badqabka §§127400-127446, 127452)
5.3 Title 22, Xeerka Qaanuunka California, §§ 96005-96020, 96040-96050
5.4 https://hcai.ca.gov/HID/Products/Hospitals/Chrgmstr
5.5 Xeerka Caafimaadka iyo Badqabka §§ 1339.55, 1339.56, 1339.59, 1339.585, 1797.98c & 128770
5.6 Sharciga Difaaca Bukaanka iyo Daryeelka Qiimaha Jaban
5.7 Xeerka Dakhliga Gudaha qodobka 501(r)

---

Taariikhda la Qoray: Janaayo 2016
Taariikhda la Muraajaceeyay: Luuliyo 2019, Juun 2021, Maarso 2022, Sibteembar 2022, Luuliyo 2023, Maarso 2024
Taariikhda Dib Loo eegay: Agoosto 2019

---